Faallo Kooban 05

Dib-u-yegleelidda nidaamka xisbiyada badan ee Soomaaliya

FARXAAN ISXAAQ YUUSUF & MAHAD WAASUGE

Sebteembar 2019

Soo koobid

Doorasho qof iyo cod ah ayaa la qorsheynayaa in ay ka qabsoonto Soomaaliya dabayaaqada 2020 iyo horraanta 2021. Hindise-sharciyeedka doorashooyinka, oo ku jiro dib-u-eegis baarlamaan, wuxuu qeexayaa in qaabka doorashadu noqon doonto metelaadda isku dheellitiran ee liiska xeran, oo ka dhaceysa hal deegaan doorasho oo ay codbixiyeyaasha diiwaangashani u codeyn doonaan xisbiyo siyaasadeed. Xeerka muhiimka ah ee xisbiyada siyaasadda oo ku jira wax-ka-beddel aan weli dhammaan ayaa nidaaminaya sidii dib loogu unki lahaa siyaasaddii ku dhisneyd xisbiyada badan ee wakhti hore meesha ka baxday. Xeerka oo ka kooban 38 qodob iyo afar jadwal oo ka hadlaya arrimaha la xiriira maamulidda xisbiyada siyaasadeed ee casriga ah, waxaa ansixiyay baarlamaankii 9-aad iyo madaxweynihii Soomaaliya sanadii 2016. 57 xisbi siyaasadeed ayaa si kumeelgaar ah loo diiwaangeliyay. Warbixintan waxay eegeysaa hanaanka dabacsan ee is-diiwaangelinta xisbiyada, waxay ifineysaa caqabadaha adag ee ku-hor-gudban is-diiwaangelinta dhameystiran ee xisbiyada iyo diiwaangelinta codbixiyaha. Warbixinta waxay sidoo kale soo jeedineysa xulashooyin la xiriira doorashooyinka iyo talooyin tixgelin mudan.

Ku saabsan Somali Public Agenda

Somali Public Agenda (SPA) waa hay 'ad aan macaash doon ahayn oo ka shaqeysa cilmibaarista arrimaha jaangoynta iyo maareynta siyaasadaha dalka xarunteeduna tahay magaalada Muqdisho. Ujeedka hay'adda waa hagaajinta maamulka dowliga ah iyo horumarinta adeegyada dowladda ee Soomaaliya iyadoo loo marayo cimibaaris iyo falanqeyn aqoon ku dhisan.

www.somalipublicagenda.org

© 2019 Somali Public Agenda

Hordhac

Soomaaliya waxaa la qorsheynayaa in ay ka qabsoonto doorasho qof iyo cod ah 2020-21. Doorashadani waxay noqonaysaa mid muhiim u ah in laga guuro nidaamkii siyaasadeed ee inta badan xernaa loona guuro nidaam muwaadiiniintu cod ku yeeshaan masiirka dalka. Soomaaliya kama aysan dhicin doorasho qaran oo qof iyo cod ah tan iyo sanadkii 1969. Hannaanka soo xulista hay'adda fulinta iyo sharci-dejinta ee Dowladda Federaalka Soomaaliya ilaa sanadkii 2012 waxaa ku-lug-lahaa odayaal dhaqameed iyo ergooyin, mana ahayn mid ay dadka xaqa codeynta leh codkooda dhiibtaan. Si loo xaqiijiyo arrintaas muhiimka ah, dhowr tillaabbo ayaa la qaaday, kuwo kalana waa lagu guda jiraa, halka kuwo kale ay wali dhiman yihiin.

Sharciga doorashada, oo udub-dhexaad u ah howlaha doorashooyinka, ayaa waxaa diyaariyay Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib-u-heshiisiinta, waxaana ansixiyay golaha wasiirada bishii May 2019. Sharciga ayaa hadda gacanta ugu jira guddi kumeelgaar ah oo ka kooban 15 xubnood oo baaramaanka ka tirsan. Guddigaan ayaa dib-u-eegista kaddib ku celinaya sharciga Golaha Shacabka si ay uga doodaan una ansixiyaan.

Qodobka 11-aad ee hindisa sharciyeedka doorashada ayaa qeexaya qaadasha nidaamka doorashada ku dhisan liiska xeran ee matalaada isku dheellitiran. Arrintan ayaa horseedeysa in xisbiyo badani u tartamaan doorashada oo ay soo gudbiyaan musharraxiintooda doorashada soo socota. Xeerka xisbiyada ayaa muhiim u ah hirgelinta nidaamkan. Xeerka ayaa nidaaminaya shaqada xisbiyada siyaasadeed wuxuuna diyaar ahaa muddo saddex sano ah.

Lixdii bishii Sebteembar 2016, madaxweynihii hore ee Soomaaliya, Xasan Sheekh Maxamuud ayaa saxiixay xeerkii xisbiyada ee wakhtiga badan la sugayay, kadib markii xubnaha baarlamaanku ansixiyeen (Goobjoog, 2016). Hoggaamiyeyaasha ururrada siyaasadeed, ururrada bulshada rayidka, iyo inta kale oo ay khuseyso ayaa si iskumid ah u tilmaamay in arrintani ay ku asteysan tahay wakhti cusub oo u curtay waayaha siyaasadeed ee Soomaaliya. Waxaana loo arkay in ay tahay tillaabo wanaagsan, isla markaana dhiirrigelineysa in laga guuro tobannaan sano oo lagu dhaqmaayay siyaasad qabiil ku dhisan, loona jiheysto dimuqraadiyad ay dadka oo dhan iyo xisibiyo badan qeyb ka yihiin, taa oo dib u soo celin karta, ugu danbeyntiina ka dhigi karta rabitaanka codbixiyeyaasha halbowlaha ciyaarta siyaasadeed.

Xeerka xisbiyada (Xeer No. 19 ee 27 Juun 2016) wuxuu ka koobanyahay 38 qodob iyo 4 jadwal. Sharciga ayaa nidaaminaya arrimo badan oo ay ka mid yihiin diiwaangelinta kumeelgaarka ah, diiwaangelinta buuxda, diidmada diiwaangelinta, is-baheysiga iyo isku biiridda xisbiyo siyaasadeed, dadka loo oggol yahay in ay ku biiran xisbiyada, xaqa iyo mudnaanta xisbiyada siyaasadeed, diiwaan-kala-laabashada, maalgelinta xisbiyada siyaasadeed, maamul-xisaabeedka xisbiyada iyo xallinta khilaafka u dhexeeya xisbiyada.

Marka la eego afarta jadwal ee sharciga, jadwalka koowaad wuxuu ku saabsan yahay xeerka anshaxa ee xisbiyada siyaasadeed; kan labaad wuxu ka hadlayaa axdiga iyo xeerarka xisbiyada siyaasadeed; jadwalka saddexaad wuxuu diiradda saarayaa shuruudaha aasaasiga ah ee heshiisyada is-bahaysiga; jadwalka afraad wuxuu ka hadlayaa guddiyada xallinta khilaafaadka, anshax marinta iyo racfaannada xisbiyada.

Tan iyo markii la ansaxiyay sharciga, konton iyo toddobo (57) xisbi siyaasadeed ayuu si kumeelgaar ah u diiwaangeliyey Guddiga Madaxa-bannaan ee Doorashooyinka Qaranka (GMDQ). Xisbiyadu waxay rajeynayaan inay helaan diiwaangelin buuxda kadib marka ay buuxiyaan shuruudaha sharciga ku xusan, si ay uga qeyb galaan doorashooyinka qaran ee 2020/21. Sharciga xisbiyada siyaasadeed hadda wuxuu ku jiraa wax-ka-beddel, isagoo u madlan in baarlamaanaanku ka doodo isla markaana ansixiyaan.

Shuruudaha diiwaangelinta kumeelgaarka ah ee xisbiyada

Sharciga xisbiyada siyaasadda waxa uu xusayaa toddobo shuruudood oo qeexaya diiwaangelinta kumeelgaarka ah ee xisbyada. Shuruudaha laga rabo waa kuwo dabacsan oo waxay irdaha u furayaan xisbiyo yar yar oo ay shakhsiyaad leeyihiin iyo kuwo kumeelgaar ah. Xisbiyadan intooda badan waxay raadinayaan in magacooda la aqoonsado, una

isticmaalaan xisbiga wadiiqo ay galaangal ugu yeeshan masuuliyiinta dalka.

Shardiga ugu horreeya wuxuu dalbayaa in codsiga diiwaangelinta kumeelgaarka ah ay ka koobnaato "*maxdarkii fadhigii ugu horreeyay xisbiga oo saxiixan*". Shardigani waa mid daciif ah, waayo uma baahna saxnaanshaha saxiixyada, sawirrada xubnaha, tiro cayiman oo aasaasayaal ah iyo xubno si loo ilaaliyo aqoonsiga magacyada iyo saxiixyada dadka liiska lagusoo daray.

Shardi kale oo uu u muuqda in uu dabacsan yahy ayaa ah khidmadda diiwaangelinta kumeelgaarka ah oo ah 10 milyan oo Shilin Soomaali ah oo u dhiganta 500 oo doollarka Mareynka ah. Lacagtan waa mid aad u yar marka la eeg lacagta siyaasadda Soomaaliya lagu bixiyo wakhtigan. Waxay u dhigantaa khidmadda diiwaangelinta meherad ganacsi oo cusub. Lacagta diiwaangelinta waxa ay ka yar tahay khidmadda Sl. Sh 5,000,000 (oo u dhiganta US $3,100) oo looga baahan yahay ururrada siyaasadeed ee doonaaya in laga diiwaangeliyo Soomaaliland, sida ku cad xeerka xisbiyada siyaasadeed ee 2011 (Linden, 2013).

Shuruudahaan dabacsan ee diiwaangelinta xisbiyada kumeelgaarka ahi waxay dhaliyeen in Guddiga Doorashooyinku diiwaangeliyo 57 xisbi kumeelgaar ah wakhtiga la qoray warbixintan. Iyadoo ay jiraan shuruudahaas, sharciga xisbiyada siyaasadeed wuxuu ku guul darreystay in kuwa sida kumeelgaarka ah loo diiwaangeliyey loo aqoonsan doono inay yihiin ururro siyaasadeed halkii ay ka ahaan lahaayeen xisbiyo siyaasadeed. Ku dhawaad dhammaan magacyada xisbiyada waxaa laga hormariyay ama laga dib mariyay erayada midnimo, cadaalad, horumar, taa oo astaan u ah farqiga yar oo u dhexeeya. Marka laga hadlo barnaamijyadooda iyo aragtidooda ma ahan mid laga heli karo meereegta, taa oo adkeyneysa in la qiimeeyo astaamahooda iyo dhabnimadooda.

Diiwaangelinta rasmiga ah ee xisbiyada

Qabashada doorashada dhammaadka 2020 iyo horraanta 2021 waxay ku xiran tahay, ugu horrayn, in si buuxda loo diiwaangeliyo xisbiyada siyaasadeed shan bilood kahor doorashooyinka la qorsheeyay, taa oo ay naga xigto 10 bilood. Iyadoo laga duulayo qaabka doorashada ee lagu caddeeyey hindise-sharciyeedka doorashooyinka qaranka, xisbiyada siyaasadeed waxay ku tartami doonaan 275-ta xubnood ee Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya. Tani waxay sahli doontaa in laga guuro habka 4.5 ee loo adeegsanayay metelaadda siyaasadeed ee Soomaaliya. Si kastaba ha noqotee, weli ma cadda sida loo dooran doono 54-ta xubnood ee Aqalka Sare (Wasuge & Moman, 2019).

Qodobka 6-aad ee ee xeerka xisbiyada siyaasadeed wuxuu soo bandhigayaa shuruudaha waajibka ah oo ay tahay in xisbiyadu ay buuxiyaan si ay u noqdaan xisbi rasmi ah oo leh muuqaal qaran. Waxaa jira 12 shuruud oo gabi ahaantooda sahlan, marka laga reebo hal shardi oo horseedi kara caqabad cabsi gelinta karta xisbiyada, waxayna sababi kartaa dib-u-dhac ku yimaada doorashooyinka muddada dheer la sugayay, iyo kusii dhaqanka nidaamka ku saleysan awood qeybsiga qabiilka ee 4.5. Shardigan wuxuu sheegayaa in xisbiyada u qalma diiwaangelin buuxda ay heystaan toban kun (10,000) oo saxiix ah, kuwaasoo ah codbixiyaal ka diiwaangashan ugu yaraan sagaal ka mid ah siddeed iyo tobankii gobol ee Soomaaliya ka jiray 1991. Inkastoo shardigani culus yahay, hadana wuxuu leeyahay faa'iidooyin.

Ugu horreyntii, xisbiyada doorashada loo sameeyay oo soo if-baxa markasta oo xilliga doorashada soo dhawaato oo aan lahayn jiritaan joogto ah waa la xakamayn doonaa maaddaama aaney heli karin wax u dhow tirada laga doonayo. Sidoo kale, kuwa kasoo goostay xisbayadooda iyo kuwa aan la dhacsaneyn siyaasadda xisbigooda uma suurta galeyso in ay samaystaan xisbi ay iyagu iska leeyihiin si ay uga hor yimaadaan xisbiyadoodii hore iyada oo ay ugu wacan tahay shuruudaha adag ee xisbi noqoshada.

Tan labaad, waxay kusoo koobeysaa xisbiyada tiro macquul ah oo u dhiganta juqraafiyada iyo tirada dadka. Tiradan xisbiyada yari waxay suurta-gelin doontaa in kuraasta baarlamaanka lagu tartamo.

Marka saddexaad, waxaa la rajeynayaa in shardigani suurta-gelin doono in la helo xukuumad xasiloon. Marka xisbiyada tartamaya ay yihiin xisbiyo awood leh sidoo kalana leh goobo laga taageersan yahay, codadku uma qeybsami doonaan xisbiyo yar-yar oo badan, taasoo yaraynaysa macquulinimada inuu soo boxo xisbi leh aqlabiyad muuqata. Taa beddelkeeda, xisbi ama isbaheysi xisbiyo ayaa helaya guul u sahasha in la sameeyo xukuumad xisbi xaakim ah, si loo raaco hirgelinta waajibaadka ay cod bixiyeyaashu u codeeyeen iyadoo aanan la carqaladeyn.

Marka afaraad, shardigaani wuxuu hor-joogsan karaa in dib loogu laabto taariikhdii xisbiyada, oo ku dhawaad qabiil iyo jufo kasta ay sameysteen xisbiyo si gaar ah u matala danahooda. Xisbiyadii hore (1960-1969), inta badan si xishood la'aan ah waxay u huwanaayeen magacyo qabiillo ama jufooyin, marka laga reebo xisbiyo yar oo muuqaal qaran lahaa.

Inkastoo qodobbadaasi ay yihiin faa'iidooyin muhiim ah, marka la eego dhaqan-gelinteedu way ku adkaan doontaa in xisbiyadu helaan tiradii xeerku dalbanaayay, ugu yaraan wakhtiga dhaw. Caqabadaha ku hor gudban shardigaani waa kuwo ka imaanaya xaqiiqooyin jira.

Ugu horreyntii, tobanka kun ee laga doonayo diiwaangelinta xisbi kasta (ee ugu yaraan sagaal gobol) waa mid adag wakhtigan. Caadi ahaan, hannaanka diiwaangelinta codbixiyeyaasha ayaa ka horreeya diiwaangelinta rasmiga ah ee xisbiyada, waana halbeeg muhiim ah oo lagu xaqiijinayo jiritaanka magacyada xubnaha xisbi kasta, waxayna caddeynaysaa in qofku aanu xubin ka ahayn xisbi kale.

Diiwaangelinta codbixiyeyaasha markasta lagama maarmaan uma ahan doorashada, sida kiisaska Koonfur Afrika 1994 iyo Latvia ay muujinayaan; doorashooyinka waxaa la qaban karaa iyadoo aanay jirin liiska codbixiyaasha haddii dalka uu yahay mid ah hal deegaan doorasho (Evrensel, 2010). Hindise-sharciyeedka cusub ee doorashooyinka Soomaaliya ayaa soo jeedinaya hal deegaan doorasho, laakiin diiwaangelin muwaadin ma jirto, si loo caddeeyo in laga maarmo diiwaangelinta codbixiyaasha. Sidoo kale, tirakoob la isku halleyn karo, dhameystiran oo casriyeysanna ma jiro, si loo billaabo diiwaangelinta codbixiyeyaasha iyo go'aaminta sida kuraasta loogu qoondeeyn karo gobollada iyadoo la eegaayo tirada dadka (Wasuge & Moman, 2019).

In cod bixiyeyaasha lagu diiwaangeliyo wakhtiga loogu talagaley ayaa ah mid adag, sababo dhowr ah awgood. Caqabadahan kuwa ugu waaweeyn ayaa ah: caqabad dhaqaale iyo farsamo, amni xumo, waxbarashada codbixiyaha oo aan jirin iyo hardanka siyaasadeed ee u dhexeeya dowladda federaalka iyo dowlad goboleedyada.

Caqabadaha farsamo: maadaama maareynta doorashooyin baaxaddan leh ay ku cusub yihiin dalka, aqoontii iyo khibraddii loo baahnaa dhanka qorsheynta iyo fulinta, oo ay ka mid tahay isticmaalidda teknoolojiyadda casriga ah ee diiwaangelinta ayaanan jirin ama bilow ah. In la xalliyo daldaoolladan jira ayaa u baahan wakhti lagu shaqaaleysiinayo dadka loo baahan yahay, tababarna lagu siiyo. Tan ayaa keeni karta dib-u-dhac ku yimaada qabashada doorashada la filayo farsamo ahaan.

Caqabaddo dhaqaale: hirgelinta dhammaan howlaha diiwaangelinta codbixiyeyaasha ayaa u baahan dhaqaale, haddii aan la helinna waxa ay la micna tahay in howshu istaagayo. GMDQ waxa uu dhawaan sheegay in ku dhawaad 21 malyan oo doollar loo baahan yahay si loo daboolo kharashaadka diiwaangelinta codbixiyaha kaliya. Dowladda federaalka ma bixin karto lacagtaas iyada kaliya maadaama miisaaniyadda sanadlaha ee dowladdu ay kabaan deeq bixiyeyaal. Sidaas awgeed, in lacagta loo baahan yahay lagu helo wakhtigeeda ayaa ah mid aan suurtagal ahayn iyadoo la ogyahay habraaca dhaqaale ee aadka u adag oo ay iticmaalaan dalalka deeq bixiyeyaasha ah. Tan ayaa sidoo kale hoos u dhigeysa fursadda horay u socoshada ee hannaanka doorashooyinka, oo ay ugu horeyso diiwaangelinta codbixiyeyaasha.

Loollanka u dhexeeya dowladda federaalka iyo dowlad goboleedyada: khilaafyada soo noqnoqonayay ee u dhexeeyay dowladda federaalka iyo dowlad goboleedyada ee sanadihii ugu dambeeyay ayaa ka dhashay mugdiga ku jira dastuurka kumeelgaarka ah oo aan awoodda labada heer ee dowladeed kala qeexin (Somali Public Agenda, 2019). Nidaamka federaalka iyo federaleynta la isku heysto ayaa caqabad kale ku ah diiwaangelinta codbixiyaha. khilaafkan ayaa marka la eego saameyn dadban ku leh qabashada howlaha diiwaangelinta codbixiyaha ee gobollada. Ilaa ay dhinacyada ku heshiiyaan arrimaha khilaafka dhalinaya sida sharciga doorashada (sida ay dalbadeen dowlad goboleedyada qaar kamid ah shirkii Garowe ee u dhexeeyay dowladda federaalka iyo dowlad goboleedyada), dadaallada diiwaangelinta codbixyeyaasha ayaa wajahaya dib-u-dhac aanan laga fursan karin.

Amni xumo: xaaladda amni ayaa caqabad ku ah diiwaanta codbixiyaha. Shaqaalaha GMDQ diiwaangelinta codbixiyaha kama sameyn karaan goobaha fog fog ee gobollo badan xaaladda amni awgeed. Sidoo kale, cabsida ah in Al-shabaab ay beegsan karaan dadka codbixiyaasha noqon lahaa ayaa ah mid ay dadku maanka ku hayaan.

Waxbarashada codbixiyaha: Soomaaliya waa dal ay dhalinyaradu ku badan yihiin, kuwaasoo badankood aanay wax baran, degganna dhulka baadiyaha. Arrinta walwalka badan ayaa ah in dhalinyaradan aysan lahayn wax khibrad ah oo la xiriirta codeyn. Arrintan ayaa ka dhigeysa kuwa aan waxba kala socon faa'iidada is-beddel ee uu codkoodu keeni karo. Sidaas darteed, in la gaaro dad aanan doorasho waxba kala socon, oo la baro muwaadin ahaan xuquuqdooda iyo waajibaadkooda – sida in la dooran karo ayna wax dooran karaan – waa howl aad u culus balse muhiim ah una baahan wakhti iyo dadaal.

Midda labaad, tobanka kun ee codbixiyeyaasha diiwaangashan ee looga baahn yahay xisbi walba ayay tahay in ay kala joogaan sagaalka gobol. In la simmo matalaadda gobolada kala duwan ma ahan mid munaasab ah, iyadoo la og-yahay in gobollada ay ku kala duwan yihiin marka loo eego dadka ku nool. Sidee ayay cadaalad ku noqonaysaa in ay 2 milyan oo qofood oo deggan gobol looga baahdo kun iyo boqol xubnood marka loo barbardhigayo gobol ay deggan yihiin hal milyan iyo kayar? Si taas loo gaaro, matalaadda xisbiyada ee gobol kastaa waa in uu ka turjumaa tirada dadka ku nool. Waa in dib loo saxaa qodobbada ku jira sharciga xisbiyada siyaasadda oo khuseeya arrinkan si loo waafajiyo tirada dadka ku sugan gobollada kala duwan, iyadoo sidoo kale la xoojinayo arrinta ugu muhiimsan ee ah in uu xisbigu yeesho 'muuqaal qaran'.

Midda saddexaad, guddi qaran ee sameeya dib-u-heshiisiin bulsho ayaanan jirin. Ilaa laga helo dib-u-heshiisiin dhab ah oo u dhexeeya qabaa'ilada isku qaba tabashooyin, sidoo kalana si weyn u aaminsan in ay dhibanayaal u yihiin gabood-fallo ay geysteen qabiil amaa qabaail kale, hirgelinta dhaqamada xisbiyada siyaasadda ma ahan mid sahlan. Shaki la'aan, xisbiyada siyaasadda waa kuwo ka shaqeyn kara gobollada kala duwan haddii qabaai'ilada la heshiisiiyo, iyadoo loo marayo is-saamixid, magdhaw iyo heshiis, dibna loosoo celiyo kalsoonidii. Dib-u-heshiisiintu waxay ka dhici kartaa meel bulshadu weli xasuustaan saameyntii iyo dhibaatadii uu reebay dagaalku. Colaadihii iyo saameeynta ay reebeen ma ahan kuwo ku dhamaanaya aasidda kii wax dilay iyo kii la dilay, balse waa ay sii soconayeen haddi aan si xikmadeysan xal looga gaarin. Sidaas awgeed, jiritaan la'aanta dib-u-heshiisiin qaran oo dhab ah ayaa abuuraysa in dadku aanay ku biirin xisbi uu hoggaan u yahay qof u dhashay qabiil ay kala dhexeyso colaad, iyagoo u arki kara in taageeridda xisbigan uu la macno noqonayo aqbalaadda sarreynta qabiilka kale.

Midda afaraad, dowlad goboleedyada qaar oo diiday in ay xisbiyada u oggolaadaan in ay xafiisyo ka furtaan goobaha ay iyagu maamulaan ayaa iyadana ah calaamad aan u wanaagsaneyn diiwaangelinta xisbiyada. Tusaale ahaan, Puntland ayaa si cad uga hadashey diidmadeeda ah in xafiisyada xisbiyada laga furo dhulka ay maamusho.

Midda shanaad, amni xumida ka jirta goobo badan oo dalka kamid ah ayaa caqabad ku ah kuna ahaan doonta in la abuuro xisbiyo qaran. Dadka hormuudka u ah xisbiyada ma gaari karaan goobaha ka baxsan dhulka ay gacanta ku hayaan dowladda federaalka iyo dowlad goboleedyada si ay muwaadiniinta ugu sheegaan waxqabadkooda, fikradahooda iyo hammigooda iyo weliba in ay ku qanciyaan in ay kusoo biiraan. Ilaa laga xaqiijiyo isku socodka dadka iyo amniga guud ahaaneed ee dalka, sharciga ayaa ahaan doono mid aanan la fulin iyadoo sidoo kale howlihii doorashada oo dhami uu dib-u-dhac ku imaanayo.

Midda lixaad, waxyaalaha ugu weyn ee caqabad ku ah in la hirgeliyo diiwaangelinta dhabta ah ee xisbiyada ayaa ah Soomaaliland, oo gooni isu taaggeeda shaacisey sannaddii 1991 arrimaheedana si gooni ah u maamusho. Diiwaangelinta rasmiga ah ee xisbiyada ay ahaan doonto mid adag ilaa laga xalliyo arrinka Soomaaliland. Gobollada woqooyi galbeed ayaa kamid ah siddeed iyo tobanka gobol oo ay tahay in xisbiyada ay ka helaan xubno codbixiyeyaal diiwaangashan si ay u muujiyaan in ay leeyihiin muuqaal qaran. Intaa waxaa dheer, in Soomalilaandi ay horey u qabatay doorashooyin dowlado hoose iyo kuwo heer baarlamaan iyo madaxweyne, waana maamul ku hormarsan dhanka nidaamka xisbiyada siyaasadeed.

Gaar ahaan, in dib-loosoo-celiyo Soomaaliland iyadoo loo marayo wadahadal dhalin kara in ay dib-ula-laabtaan go'aankooda ilaaliyaanna midnimada qaranka waa mid aanu wakhtigeedu dhaweyn maadaama wadahadalaadii u dhexeeyay labada dhinac ay hakadeen tan iyo markii uu madaxweyne 'Farmaajo' xukunka qabtey bilawgii 2017. Haddii wadahadaladii dib-loosoo-celiyo, ma keenayaan xal degdeg ah oo fududeynaya hannaanka diiwaangelinta rasmiga ah ee xisbiyada.

Xulashooyin kale ee doorashada xisbiyada badan

Iyada la oghay waqtiga gaaban ee ka harsan doorashooyinka soo socda iyo caqabado badan oo kor lagu xusay, in sameeyo diiwaan gelinta buuxda ee xisbiyada siyaadeed ka hor shan bilood xilliga la qorsheeyay ayaa ah mid aan suurtagal ahayn. Waxaa jirta halis dhab ah in ay dib-u-dhacdo doorashada qof iyo cod ka ah si looga guuro siyaasada qabiilka ku dhisan ee xidideysatay.

Diiwaangelinta xisbiyada keliya kuma filna in la qabto doorashada, inkastoo ay tahay asaaska geedi-socodka. Sharciga doorashooyinka iyo habraacyada daruuriga u ah qabashada doorashada ma diyaarsano illaa iyo hadda, oo ay ugu weyn tahay diiwaangelinta codbixiyeyaasha, mana lagu dhammayn karo wakhtiga haray. Sidaas darted, waa in tixgelin la siiyaa xulashooyinka ku saabsan qabashada doorashooyinka xisbiyada baan.

Xulashada Dhowr Magaal Doorasho: hal mid oo dhici karta ayaa ah in la qabto doorasho ah in la abaabulo nus milyan codbixiyaal jooga shanta caasimadood ee maamul goboleeedyada, ayna maamulayan guddiga doorshda. Diiwaangelinta rasmiga ah ee xisbiyada waa in la fududeeyaa si arrinkaani u qabasoomo. Tusaale ahan, shan kun oo xubnood oo ka diiwaangashan afar dowlad goboleed ayaa shuruud looga dhigayaa diiwaangelinta xisbiyada siyaasadeed beddelkii 10 kun oo xubnood iyo sagaal maamul goboleed. Xisbiyadu waxa ay usoo gudbinayaan liiska musharixiinta GMDQ. Nuska milyanka codbixiyaasha ah ayaa la keenayaa magaalooyinka caasimadaha dowlad goboleedyada (iyo labo magaalo kale haddii uu amnigu saamaxo) waxayna u codeynayaan xisbiyada siyaasadeed ee buuxiyay shuruudaha diiwaangelinta.

Xulashaadani waxay beddeli kartaa doorasho qof iyo cod ah oo ka qabsoonta wadanka oo dhan, waase haddii shuruudahaan la dhameystiro.

Xulashada Baabi'inta Diiwaangelinta Rasmiga ee Xisbiyada: xulasho kale ee abaabulka doorashooyinka qaran ayaa ah in la baabi'iyo shuruudaha diiwaangelinta rasmiga ah. Dhammaan xisbiyada siyaasadeed ee diiwaangashan waxay xaq u yeelanayaan in ay u tartamaan doorashooyinka qaran. Qaabka doorashada ayaa

noqoneysa matalaadda isudheellitiran ee liiska xeran iyo hal deegaan doorasho qaran. Xisbi kasta oo siyaasadeed wuxuu GMDQ u gudbinayaa liis xiran oo ah 275 musharrax oo u taagan xubinnimada Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya. Xisbi waliba waa inuu sidoo kale bixiyaa $2,000 oo ah lacagta diiwaangalinta musharax kasta ($550,000 wadarta guud).

Intaa waxaa dheer, GMDQ waxaa uu diiwaangelinayaa codbixiyayaasha jooga meel kasta oo dalka kamid ah oo ay suurgal tahay in diiwaangelin laga sameeyo. Qodobka 13-aad ee hindise-sharciyeedka doorashooyinka qaranka, oo waajibinaya in xisbiyada siyaasadeed ee hela ugu yaraan 7% wadarta codbixiyaasha ay xaq u yeeshaan kuraasta, ayaa si buuxda loo dhaqan gelinayaa. 7% (19 xildhibaan) ayaa beddelaya diiwaangelinta rasmiga ah ee xisbiyada ee ku xusan sharciga xisbiyada siyaasadeed. Axsaabta hela in kabadan 7% wadarta codbixiyaasha waxaa loo aqoonsan doonaa inay yihiin xisbiyo qaran oo rasmi ah.

Diiwaangelinta codbixiyeyaasha ayaa ah aasaaska doorashada, xulashadani ma shaqeyn karto haddii GMDQ aanu diiwaangelin codbixiye sameynin. Haddii GMDQ uu diiwaangelin karo in ka badan hal milyan oo codbixiyeyaal ah kahor Diseembar 2020, xulashadani waxay gacan ka geysan kartaa qabsoomidda doorashooyinka qaran oo ay xisbiyo badani u tartamaan kuraasta.

Talooyin tixgelin mudan

1. Gudiga Madaxa-banaan ee Doorashooyinka Qaranka waa in uu dardargeliyaa dadaallada diiwaangelinta codbixiyeyaasha oo ay sida ugu dhaqsiyaha badan u billaabaan. Haddii in ka badan hal malyan oo codbixiye la diiwaangeliyo kahor bisha Diseembar 2020, tani waxaa ay saldhig fiican u noqon kartaa sahminta xulashooyinka ku habboon doorashada.
2. GMDQ waa in uu ku qanciyaa maamul goboleedyada in ay u oggolaadaan xisbiyada siyaasadeed ee curdanka ah inay xafiisyo ka furtaan magaalooyinka ay ka arrimiyaan. Tani waxay yareyn doontaa culeysyada xisbiyada ka heysto in ay xubno ka helaan deegaanno kala duwan si ay u noqdaan xisbi leh muuqaal qaran.
3. Sameynta xafiiska isku xirka oo ay xubno ka yihiin xubno matalaya dowladda federaalka ah iyo dowlad goboleedyada ayaa gacan ka geysan kara isku-xirka labada heer ee dowladeed. Xafiiska waxa uu ka shaqeynayaa xalinta mushkiladaha la xiriirta xisbiyada siyaasadeed, ololaha doorashada iyo hanaanka doorashada. Tani waxay u baahan tahay oggolaanshaha dhammaan daneeyayaasha ay khuseyso si ay u dareemaan lahaanshaha go'aannadii la qaatay oo ay guul uga gaaraan mashruuca weyn ee dhisidda dawladnimada.
4. Waxaa jira baahi loo qabo in dib loo nidaamiyo 10,000 oo qofood ee shuruudda diiwaangelinta oo ku saleysan heer gobol loona beddelo heer dowlad goboleed maaddaama dalku u weecday nidaam federaal ah. Xisbiyada waxaa lagu shardin karaa in looga baahan yahay inay ka helaan tirada xubnaha loo baahan yahay keliya dowlad goboleedyada iyo Muqdisho, oo ah magaalo madaxda iyo maamul weyn.
5. Dib-u-heshiisiin qaran waa in lagu daraa ajendaha lagu doonayo in lagu xaliyo cabashooyinka qabiilka. Tani waxay gacan ka geysaneysaa in la helo xubinnimo xisbiyeed oo qabaa'illadu isku milmaan iyo in la abuuro dhaqan madani ah oo ka madax bannaan sifooyinka qabiilka. Tani waxaa looga baahan yahay guddi dib-u-heshiisiin ah oo maangal ah, waana in ay xubno ka noqdaan shakhsiyaad lagu kalsoon yahay, nadiif ah, oo isfaham dhalin kara.
6. Xisbiyada siyaasaddu waxaa lagaa rabaa in ay ka dhigaan barnaamijkooda siyaasadeed, xubinnimadooda iyo xogtooda maaliyadeed iyo wixii la mid ah kuwo ay heli karaan dadweynaha si ay ragti uga yeeshaan.
7. sharciga xisbiyada siyaasadeed waa in dib loo eegaa si loogu daro qodob sahlaaya matalaadda dhalinyarada iyo haweenka ee guddiyada fulinta ee xisbiyada si ay ugu suurtagasho inay fikrad ku yeeshaan sida siyaasadaha iyo barnaamijyada loo qaabeeyo.

Tixraac

Daud, A. H., 2017. *Somaliland: Political Parties or Clan Parties?*. [Online]
Available at: https://www.hiiraan.com/op4/2017/jan/139620/somaliland_political_parties_or_clan_parties.aspx
[Accessed 5 August 2019].

Evrensel, A., 2010. Voter Registration in Africa: A Comparative Analysis. *Electoral Institute for Sustainable Democracy in Africa (EISA)*.

Goobjoog, 2016. *President signs into law Political Parties Bill*. [Online]
Available at: https://goobjoog.com/english/president-signs-into-law-political-parties-bill/
[Accessed 15 July 2019].

Linden, J., 2013. Somalia's Democratic Transition: Somalia's Democratic Transition:. *The Electoral Knowledge Network*.

Somali Public Agenda, 2019. Division of powers and responsibilities in a federal Somalia. June, Issue 4, p. 1-4.

The Federal Republic of Somalia, 2012. *Provisional Constitution*. [Online]
Available at: http://hrlibrary.umn.edu/research/Somalia-Constitution2012.pdf
[Accessed April 2019].

Wasuge, M. & Moman, P., 2019. Review of Somalia's draft national election bill. *Somali Public Agenda,* 22 July, Issue 4, p. 4.

Turjumidda Af-Soomaaliga waxaa sameeyay

TAYO TRANSLATIONS

***Tixanaha Doorashada**: doorashooyin baarlamaan iyo madaxweyne ayaa la filayaa in ay Soomaliya ka dhacaan dhammaadka 2020 iyo bilowga 2021. Waxa aan bilownay qormooyin tixane ah oo la xiriira doorashooyinka. Qormo kasta waxa ay falanqeyneysaa mowduuc la xiriira doorashada. Faalladan waa middii labaad ee tixanaha. Somali Public Agenda waxa ay soo dhaweyneysaa talooyinka iyo fikradaha la xiriira doorashooyinka la filayo in ay ka dhacaan Soomaaliya.*